Daryeellayaasha Fiktooriya

Daryeellayaasha Fiktooriya waa ururka keliya oo ka jira Dawlad goboleedka oo dhan kaas oo diirida saara keliya daryeellayaasha qoyska. Doorkayaga ugu weyni waa in aan matalo danaha daryeellayaasha kuna hadalo magacooda dhamaan heerarka dawladeed iyo kan adeegbixiye. Waxaan kaloo bixinaa macluumaad iyo kaalmo, latalin iyo waxbarasho.

Yaa ah daryeelle?

Daryeelle waa qof daryeel lacag la'aana iyo kaalmo siiya xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib kaas oo qaba iin, jiro dhimirka ah ama xaallad caafimaad oo aan kala go lahayn. Qofka la daryeellayaa wuxuu noqon karaa ilmo, waalid da' ah, saaxiib ama qof aad wada nooshihiin.

Maxay Daryeellayaasha Fiktooriya u qabtaan daryeellayaasha?

Latalin iyo Kaalmo

Talasiintu waxay ku saabsan tahay kala hadlida qof ku caawimi kara kaas oo noloshaada daryeel wax ku kordhin kara. Raadinta taladu maaha calaamad guuldaro, wax qabad la'aan ama dareemid awood daro. Balse, waa wax u qabashada naftaada – haddii aan sidaas la samayn sidee u siin kartaa daryeelka ugu fiican qofka aad jeceshahay ama aad masuulka ka tahay?

Talasiintu waxay ku qoran tahay Ingiriis iyo 39 kale luqadood oo kale.

Waxaa lagu bixin karaa telefoon iyo iyadoo qofka la hor fadhiisto. Hadda lacag la'aan ayey u tahay daryeellayaasha.

Waxaad kaloo helli kartaa **kaalmo** iyadoo lagu bixinayo macluumaad wanaagsan iyo ka caawimida dhibaatooyin gaara, tusaale ahaan sida lagu hello Lacagta Daryeellayaasha ama Gunada Daryeellaha.

Adeegyadaani waxay siiyaan ahmiyad weyn xafidida sirta qofka.

Kooxaha Kaalmada Daryeellaha (Carer support groups)

Adeega qawmiyadeed ee agtaada ah ayaa laga yaabaa inay siiyaan daryeellayaasha jaalliyadaada koox kaalmo daryeel, ama Daryeellayaasha Fiktooriya ayaa laga yaabaa inay xiriir la sameeyaan koox u dhow agtaada.

Kooxaha kaalmada daryeelluhu wax weyn ayey u yihiin daryeellayaasha. Waana halka daryeellayaashu gartaan in la dareensan yahay ayna dadka la wadagaan waxa ka jira doorkooda daryeel waxayna kala siyaadsan karaan khibrad. Kooxda isu timaadaa waxay siiyaan nasasho iyo fasax kuwa wax daryeella. Kooxaha qaarkood waa kuwa guud kuwa kalena waxaa loo asaasay xaallad gaara sida Cudurka loo yaqaan Parkinson's disease, jirada dhimirka.

Carers Victoria, Level 1, 37 Albert Street (PO Box 2204) Footscray VIC 3011
P 03 9396 9500 F 03 9396 9555 E cav@carersvic.org.au

ABN 12 533 636 427 INC NO A0026274M

Waxbarasho

Daryeellayaasha Fiktooriya waxay siiyaan barnaamij wax barasho oo gobolka oo dhan ah daryeellayaasha. Kuwaa waxaa loogu talagalay in lagu caawimo daryeellayasha si ay u daryeellayaan caafimaadkooda iyo samaqabkooda, si ay u sii yeeshaan tabarta lagu sii wadi karo masuuliyada daryeelka, ayna naftooda faaiido ugu yeeshaan. Waxaan u qaabaynaa barnaamijkeena si baahida gaarka ah oo kooxda wax looga qabto. Haddii aad xubin ka tahay kooxda daryeelka, weydiiso hawlfududeeyuhu inuu la xiriiro Daryeellayaasha Fiktooriya si ay sameeyaan Barnaamij.

Kani daryeellayaasha ku kalifi maayo. Xaalladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in lacag la isweydiiyo.

Dhamaan adeegyadeena la xiriir: Lacag la'aan
1800 242 636*

Adeegyada Nasinta ee Waaxyaha Gobolka

Waa maxay nasniintu? Waa nasniin la siiyo daryeellayaasha – waqtigii nasashada, ku raaxaysiga waxaad jeceshahay ama waqti la qaadashada saaxiibadaa. Waxaa jira sagaal waaxyood oo adeeg nasniineed Fiktooriya gudaheeda. Waxay ka caawimi karaan wixii khuseeya nasniinta degdegta ah, nasniinta guriga ama xarunta ku salaysan ama nasniin muddo dheer ah halka qofkaad daryeeshaa la geeyo daryeelka halka la degan yahay.

Ujeedada nasniintu waa in lagaa caawimo xagga nolosha daryeele ahaan. Daryeelidu waxay siisaa waxyaallo badan oo wanaagsan daryeellayaasha – farxad ku xafidida qofka guriga, daryeelka ugu fiican, isfaham qota dheer. Laakiin waxay kaloo noqon kartaa wax adag, dhib badan waxayna keeni kartaa caafimaad xumo iyo aan daryeellid la samayn. Fasax joogto ah oo laga qaato daryeelida ayaa muhiim u ah bixinta daryeelka iyo qaadashada nolol tayo leh oo naftaada ah.

Lacag la'aan: 1800 052 222*

**Waa lacag la'aan marka laga saaro moobaylka.*

Kaalmo dhaqaale

Lacagta Centrelink oo lagu taageerayo daryeellayaasha waa:.

Lacagta daryeelluhu waxay leedahay shuruud, waxaana la eegaa dakhliga qofka, waana marka qofka daryeellayaa aanu sii wadi karin shaqa buuxda masuuliyada ka saaran daryeelaha darteed. Haddii qofku xaq u yeesho, waxaa laga yaabaa inuu xaq u yeesho dhimista caawimada telefoonka ama ijaarka. Waxaana la bixiyaa labadii asbuuc hal mar.

Gunada daryeelluhu shuruud ma leh waana lacag yar oo wax lagaga qabto kharajka lacageed oo lagu bixiyo kharajka ka yimaada qof ku daryeelida guriga. Warbixinta mihnadlaha caafimaadka ayaa loo baahan yahay marka la dalbanayo. Waxaana la bixiyaa labadii asbuuc hal mar.

Wac Daryeellayaasha Fiktooriya (Carers Victoria) wixii talo ah oo ku saabsan buuxinta foomka dalabka.

Centrelink : 13 12 02